



# URURKA DARYEELKA DISTOORKA (UDDAA) PROMOTION OF THE CONSTITUTION GROUP

**WAR SAXAAFADEED: 30 Noofembar 2009**

## **Xukunada Guddiyada Nabadgalyadu waa Xaaraan iyo Ku-xadgudub Xuquuqda Muwaadiniinta, waxaanay dhaawacaysaa sumcaddii Somaliland**

**Ururka Daryeelka Distorka Somaliland (UDDAA)** wuxu mudaba ku guubaaninayey Xukuumadda Somaliland in ay joojiso xukunada lidka ku ah Distorka Somaliland ee ay go'amiyan Gudiyadda Nabadgelyadu, waxa urukan markale la yaab ku noqotay hadalada dhawaan ka soo yeedhay Guddoomiyaha cusub ee Gobolka Maroodi-Jeex, Maxamed Cabdi Daa'uud, ee uu ku tilmaamay Guddiyadan kuwo sharciga iyo dastuurka dalka waafaqsan. Guddoomiyaha oo isla markana ah gudoomiyaha Gudida Nabadgelyada ee gobolka, wuxu hadlakiisani ka markhaati kacayaa in xukuumadu ay ku adkeysaneyso in ay sii wadi doonto xidhixidhida dadka badan ee gudiyadani xabsiga u taxaabaan iyada oon maxkamad sharci ah lasoo hortaagin.

Waxaanu xasuusineyna ummadda oo dhan in aanay ilaawin muwaadiniinta weli lagu cabudhinayo xeerkii ka hadhay kali taliskii haligmay, iyadoo maanta suuro gal inoo tahay inaynu cidii danbi gasha la marin karo laamaha caddaladda iyo maxkamad sharci ah. Ma jirto cid diiddani hawlaha la xidhiidha sugidda nabadgeyada ee Gudiyadani u xilsaaraniyiin, laakin xaq uma laha in ay maroorsadaan awoodihii maxkamadaha, waanan ka xunahay in maxkamadihii difaaci lahaa awoodahooda garsooreed iyo xuquuqda distorku muwaadininta siiyey ay ilaa hadda ka gaabsadeen in ay xabsiyadda ka sii daayaan dadkan Gudiyadu iska xidheen.

Ururka UDDAA iyo ummadaba wey u muuqataa in xukuumadani aanay ka damqaneyn ku xadgudubka xuquuqda muwaadiniintan ay Gudiyadani iska xidheen. Taas waxaa u dheer in aad moodo in aanay dan ka lahayn magac xumida arrimahani u keeneen sumcada Somaliland iyo xeer ku dhaqanka (rule of law) ee aynu ku faano. Sannadakan 2009 aynu ku jirno oo kaliya waxaa cambaareeyey xukunnadda ay ridaan Gudiyadan Nabadgelyadu ugu yaraan 3 hay'adood oo caalami ah oo warbixinadooda aduunka oo dhan laga akhristay. Kuwaas oo kala ah:

1. Warbixinta Sannad kasta ee ku saabsan xuquuqda aadimiga ee ay soo sarto Xafiska Arrimaha Dibedda ee Mareykanka (US State Dept Human Rights Report 2008) oo soo baxay 25kii February 2009:  
<http://www.state.gov/g/drl/rls/hrrpt/2008/af/119024.htm>.
2. Haya'da caalamiga ah ee Amnesty International oo warbixin gaar ah kasoo saartay Somaliland 17kii March 2009:  
<http://www.amnesty.org/en/library/info/AFR52/001/2009/en>
3. Haya'da caalamiga ah ee Human Rights Watch oo soo saartay warbixin gaar ah oo ku saabsan Somaliland 13kii July ee 2009:  
<http://www.hrw.org/en/news/2009/07/13/somaliland-fragile-democracy-under-threat>

Kuwan ka hor, Qaramada Midoobay (QM) Ergeyga madaxbanaan ee u xilsaaran arimaha xuquuqda aadamiga Somaliland iyo Soomalalya dhowr jeer ayuu xukunadan Gudiyadda

Nabadgelyada Somaliland ka hadlay, waxaana ka mid ah warbixintii uu u gudbiyey QM bishii March 2008kii:

<http://www.universalhumanrightsindex.org/documents/863/1346/document/en/pdf/text.pdf>

Bal aynu soo qaadano warbixintii Hay'adda Human Rights Watch oo tidhi:

"Xoghayaha Gudida Nabadgelyada ee Gobolka Hargeysa [Cabdisalaam Cali Nuur] wuxuu noo sheegay in Gudidiiso xidhay sanadkii 2008 iyo bilowgii 2009kii 249 qof. Markii Human Rights Watch tageen xabsiga Maandheere bishii Maarso 2009, shaqaalaha xabsiga ayaa u cadeeyey in 554kii maxbuus ay 300 xabsi ku xukuntay Gudida Gobolka Hargeysa." (bogga 29aad ee warbixinta)

Warbixinto waxay kaloo sheegtay in Hay'adu ay la kulantay Gudoomiyihii hore ee Gobolka Hargeysa iyo Gudoomiyaha Gobolka Togdheer horaantii sannadkan, waxaanay tidhi Gudiyadu iskumaba dayaan in ay xuquuqda dadka gebi ahaanba tixgeliyaan. Tusaale ahaan bishii February 2009, Gudida Togdheer waxay xabsiga u taxaabisay ila 150 qof oo ay mar kaliya xukun 6 bilood ah ku xukuntay.

Hore ayaanu anaga, iyo Ururo kale oo badani uga codsanay xukuumadu in ay joojiso xukunaddan Gudiyadani go'amiyaan. Haddaba hadalakan Gudoomiyaha cusub ee Gobolka Hargeysa wuxu uun sii cadeynayaa in xukumadani ay maroorsigii awoodaha garsoorka halkii uun kasii wadidoonto. UDDAA waxay so jeedineysaa in:

1. Xisbiyada iyo murashixinta doorashooyinka soo socdaa, heer kastaba, waa ina ay ;
  - b) Si cad oon madmadaw ku jirin u balanqaadaan in ay Gudiyadan ka joojin doonaan awoodahan ay shaqadii Waaxda Garsoorka ka maroorsadeen;
  - t) Kuna dhawaaqaan in ay xabsiga kasii deyn doonaan cid kasta oo u xidhan Gudi Nabadgelyo, qofkii denbi Xeerarka ku cad galeyna maxkamad si deg deg ah markiiba loo hor keeni doono.
2. Golayaasha Wakiilada iyo Guurtida waa in ay so saaraan xeer gaaban:
  - b) Oo cadeynaya in qof kasta oo dembi lagu tuhummo la mariyo wadooyinka Xeerarka Ciqaabta iyo Habka Ciqaabta ay dhigayaan oo cid aan Booliska, xeerilaalinta iyo maxkamadaha aheyni aanay awood u laheyn in muwaadiniinta xabsiga u taxaabaan; Gudiyada Nabadgelyaduna ay ku ekaadaan hawlaha guud ee sugidda nabadgelyadda.
  - t) In ciddii xorriyadda qofka u duudsida si aan sharciga waafaqsaneyn uu mutaysanyo ciqaab sida ku qoran Qodobka 27(9) ee Distoorka Somaliland.
3. Ururada rayidka ahi waa in ay ka war hayaan oo u halgamaan dadka ay xidhaan Gudiyadda Nabadgelyadu.
4. Shacabka Somaliland waxaanu ku guubaabineyna in ay weydiyaan xisbi kasta iyo murashax kasta halka ay arrintan ka taaganyihiin oo ay tixgeliyaan marka doorashooyinka yimaadaan ciddii xoojineysa cadaaladda iyo ilaalinta xuquuqda ee xorriyadaha distoorku kafaaloqaadanaya.
5. Maxkamada Sare iyo maxkamadaha kaleba waxaanu mar kale usoo jeedineyna in ay kasii daayaan xabsiyadda cid kasta oo si aan waafaqsaneyn xeerarka iyo Distoorka xabsi lagu xukumay.

Waxa xusid mudan in hadalo iska soo horjeeda ay Xukumadani ilaa intii ay jirtay ka sheegay xeerarka ay u cuskaneysa awoodaha Gudiyadan Nabadgelyadda. Haddaba,

Xukuumada waxaanu leenahay mar haddii aad cadeysateen in aydun Gudiyadan ku dhaqankooda sii wadaysaan, ummadda si cad oo qoran u tusa oo una faafiya qdobadda iyo Xeerarka aad leedhiin Gudiyadan awood garsoor bay leeyihiin. Kumaankunka qof ee xorriyadoodii Gudiyadani ka qaadeen, iyo ehelada dadkaasiba, xaq bay u leeyihiin in loo tuso si cad oo qoraal ah xeeraraka loo cuskaday. Tan kale, Guddoomiyaha Gobolku waa shaqaale dawladeed oo la mid ah agaasimaayasha iyo madaxda sare ee masuuliyiinta maamulka dawladda (public officers), waxaanu markaas xasuusineynaa in aanay arrimaha siyaasada xisbiyada iyo doorashooyinka faraha la gelin oo dhexdexaad siyaasada xisbiyada ka ahaadaan.

Uruka UDDAA wuxu aaminsanyahay in Gudiyada Nabadvigelyadu sidan ay hadda dadka ay u xidhixidhayaan ay carqalad weyn ku tahay kobcinta cadaalada iyo dimuqraadiyadda curdinka ah ee dalkeenna, caqabadna ku tahay sumcada wadankeena iyo qadiyadeena.

---

**URURKA DARYEELKA DISTOORKA (UDDAA) - Promotion of the Constitution Group** - waa koox-cadaadis (pressure group) ka madaxbanaan xisbiyada siyaasada, oo ay xubno ka yihiin Somalilanderka qurbaha deggan oo aaminsan in loo baahanyahay in hor loo mariyo oo la kobciyo Distoorka Somaliland. Diimoqraadiyadda, ku dhaqanka xeerarka, kala xadeyn taawoodaha waaxyada dawladda, iyo xuqquuqda iyo xorriyadaha aasaasiga ah waa tiirarka Distoorka. Ujeedooyinka UDDA waxa weeye sharaxaada baahida loo qabo in laga hor tago fasiraada khaladka ah iyo kuxadgudubka Distoorka, iyo in loo olaleeyo garsoor madaxbanaan oo si karti leh u uga soo baxa hawshiisa sida gaarka ah Distoorku u cayimay.

Mareegto: <http://www.udaaasomaliland.blogspot.com>

Isuduwayaal: Lulu Farah [luluforumuk@yahoo.co.uk](mailto:luluforumuk@yahoo.co.uk) Khadar Ali Gaas [somalilander\\_1@yahoo.co.uk](mailto:somalilander_1@yahoo.co.uk)  
La Taliye: Ibrahim Hashi Jama [ibrahim@somalilandlaw.com](mailto:ibrahim@somalilandlaw.com)